



TURNING STONE ENTERPRISES

KU SOCOTA: Dhammaan Xubnaha Kooxda
KA SOCOTA: Kawel LauBach
Madaxweyne Ku Xigeenka Sare, People & Culture
TAARIKHDA: Sibteembar 11, 2023
TIXRAACA: Cusbooneysiin lagu sameeyay Hab-raacayaga Gudaha ee Soo-Dhijinta Shaqooyinka

Iyada oo qayb ka ah xeeladayada ku aadan wanaajinta sii haysashada xubnaha kooxda ee qiimaha leh, Waaxda People & Culture waxay cusboonaysiinaysaa hanaankayaga gudaha ee soo-dejinta shaqooyinka ee muddada-dheer jiray iyadoo codsadyaasha shaqada gudaha siineysa mahadho diirada saareyso shaqada, isla markaana muujineyso saaxiibtinimo iyo taageero.

Haatan, xubnaha kooxda ee daneynaya inay u wareegaan boos cusub waxay buuxiyaan foomka codsiga ee gudaha kaasi oo uga baahan inay helaan saxiixa kormeerahooda. Hannaankayaga haddeer jira waxa uu shuruudo walaac badan ku qabtaa xubnaha kooxdayada, kuwaas oo ay cabsi gelin karto in kormeerahooda ay u sheegaan inay jecel yihiin in ay ka shaqeeyaan waax kale. Hanaanka haddeer jira ayaa laga yaabaa inuu xubnaha kooxda ka horjoogsado inay raadsadaan fursado shaqo oo cusub oo ka dhex jira ururkayaga sababtoo ah dhibaatooyin la xiriira la hadalka kormeerayaashooda.

Waxaan haysan karnaa hibada-xirfadeed haddii aan dhiirigelina kobac shaqo oo laga helo gudaha ururkayaga. Sidaa uku, waxaanu samaynay hannaan cusub oo dhigayo in xubnaha kooxdu ay daneyntooda ku aadan wareejinta gudaha ururka ah si toos ah ugu gudbin karaan kooxda Helitaanka Hibada-xirfadeed (Talent Acquisition) iyaga oo aan ogaysiin kormeerayaashooda inay daneynayaan jago cusub. Haddi kooxda Helitaanka Hibada-xirfadeed iyo waaxda shaqaalaynta labaduba ay go'aamiyaan in codsadaha katirsan ururka uku haboon yahay booska uu raadinayo, waxaanu si toos ah ula xidhiidhi doonaa hogaanka xubinka kooxda ee haddeer si aanu uga codsado tallo ku saabsan waxqabadka codsadaha, dhaqankiisa, iyo wixii kaloo arrimo ah ee khuseeya tixgelinta daneynta booska cusub ee xubinka kooxda. Marka la go'aamiyo in musharraxa ka tirsan ururka ku haboon yahay booska uu raadinayo, kooxda Helitaanka Hobada-xirfadeed ayaa waxay xaqiijin doonaan wada-xiriir furan oo u dhaxeeyo waaxda shaqaalaynta iyo waaxda xubinka kooxda ee haddeer. Si meesha looga saaro shakiga, ma jira xubin kooxeed laga shaqaaleysiin doono waax cusub iyada oo aan lagala tashan cidda haddeer hogaanka u ah. Waxaa intaa dheer, waxaanu cidda hogaanka u ah waaxda haddeer siin doonaa ogaysiis ku filan oo ku saabsan wareejinta soo socota si waaxdu ay u qaado tillaabooyin degdeg ah oo ay dib ugu buuxinayso booska iyo si ay u hesho cid si ku-meelgaar ah u qabato shaqada marka xubinka kooxda la wareejiyo.

Hadafka hanaankan la cusboonaysiiyay waa in xubnaha kooxda ee waxqabadka sare leh lagu dhiirigaliyo inay ku sii jiraan ururkayaga, inagoo ku dhiirigelinayna inay gudaha ururka ka raadsadaan fursado buuxinaya rabitaankooda shaqo iyo danahooda. Sidaas awgeed, waaxda haddeer iyo waaxda shaqaalaysiinta waa in aanay xaqirin waax kale si ay u sii haysataan ama u shaqaaleysiyaan xubin kooxeed. Dhanka kale, waa in waaxda aysan u ballan qaadin xubin kooxeed wax ah magdhow ama faa'iidooyin si ay u sii haystaan ama u shaqaaleysiyaan xubinka, maadaama arrimahaas ay tahay inay ansixiyaan Waaxda People & Culture iyadoo la tixgalinayo saameynta ka soo gaari karta ururka oo dhan.

Sida had iyo jeerba, fadlan xor u noqo inaad la xiriirto qof kasta oo naga mid ah haddii aad qabtid su'aalo ama walaacyo.